Ka hor inta aanay dacwadaada qaxootinimada bilaabmin

Maxaa laguu siinayaa warbixintaan?
Waxaad rabtaa in aad magangelyo ka codsato Nederland. Dacwada qaxootinimada ma bilaabmayso isla marka aad Nederland timaado. Waxaa lagu siinayaa waqti aad kaga nasato safarkaaga iyo in aad isugu diyaariso dacwada qaxootinimada ee guud. Sidaa awgeed ugu yaraan lix maalmood ayaa lagu siinayaa. Wakhtigaasi waxaa loo yaqaan muddada nasashada iyo is diyaargareynta (RVT). Warbixintaan waxaad ka akhrisaneysaa waxyaabaha dhacaya ka hor bilowga dacwada qaxootinimada.

Talaabada 1: Isdhiibida iyo isdiiwaangelinta

Waxaad iska dhiibeysaa xaruunta qaabilista ee Ter Apel. Shaqaale Hay'ada Socdaalka iyo Jinsiyada (IND) ayaa diiwaan gelinaaya macluumaadkaada shaqsiga ah. Adigana waxa aad buux buuxineysaa foom oo warqad ah ama mid ku yaal kombiyuutarka. Markaa keddib waxaa aadeysaa Boliiska Dadka Ajaanibta ah (AVIM).

POLITIE

Booliska dadka ajaanibta ah (AVIM) waa qeyb ka mid ah booliska Nederland waxayna kormeerayaan dadka ajaanibta ah ee Nederland.

Shaqaalaha booliska dadka ajaanibta waxay diiwaangelinayaan macluumaadkaaga shaqsiga ah, sida magacaaga, taariikhda dhalashadaada iyo jinsiyadaada. Waxay baarayaan dharkaaga iyo boorsooyinkaaga waxay kaa qaadayaan sawir iyo sawirka faraha. Waxaa lagu siiyay qoraal warbixin oo ay ku sharraxan tahay sababta lagaaga qaaday sawirka faraha. Waxay kaloo ku weydiin karaan shaqaalaha booliska dadka ajaanibta ah su'aalo ku saabsan wadada safarkaaga, ama aad horey magangelyo uga codsatey halkaani ama meel ka mid ah Europe iyo in ay qoyskaaga dad ka mid ah ay halkaan joogaan ama meel kaloo Europe ah.

Ma haysataa dokumentiyo cadeynaya qofka aad tahay,sida baasaboor, warqada aqoonsiga, shahaadada dhalashada ama sharciga baabuurta lagu wado? Ama waxaad haysataa dokumentiyo cadeynaya safarkaaga ama sheekadaada wax ku kabaya, sida tikidhka dayaarada, boardingpass, shahaadooyin, xukun ama maqaal jariidad? Soo gudbi dokumentiyadaasi inta lagu jiro diiwaan gelinta ama dalbo dokumentiyadaan inta aanay dacwadaada qaxootinimada bilaabmin. Qof ka tirsan VluchtelingenWerk ayaa arintaan kaa caawini kara.

VluchtelingenWerk Nederland

VluchtelingenWerk Nederland (Ururka Gargaarka Qaxootiga Nederland) waa urur madax banaan ee u taagan xuquuqda aadanaha waxaana loo asaasey in uu danaha qaxootiga ilaaliyo. Ururka qaabilsan gargaarka qaxootiga (VluchtelingenWerk) wuxuu kuu siinayaa warbixin iyo sharaxaad ku saabsan dacwada qaxootinimada, si shaqsi ah kuugu wargelinayaan, kaa garab istaagi sida aad ula socon lahayd dacwadaada iyo idiin dhexdhexaadinaya adiga iyo hay'adaha dhibaatada kaala dhaxeyso. Waxay si hoose oo arimahaan ku saabsan ula shaqeynayaan looyarkaaga. Ururka gargaarka qaxootiga (VWN) go'aan kama gaarayaan codsigaaga magangelyada ah.

Dokumentigaaga waxaa soo baaraya khubaro oo eegaya in ay dhab yihiin. IND waxaa ay dokumentigaan u isticmaalaysaa qiimeynta codsigaaga magangelyada ah.

Ka digtoonow! Macluumaadkaaga shaqsiga ah iyo dokumentiyadaada waa u muhiim qiimeynta codsigaaga magangelyada ah. Noqo qof ay wax u dhan yihiin iskana hubi in macluumaadkaaga ay dhan yihiin si sax ahna loo qorey. Weligaa ha tuurin dokumentiyadaada. Dowlada Nederland uma gudbinayaan weligood dowlada wadanka aad asalkaa ka timid in aad magangelyo ka codsatey Nederland.

Talaabada 2: Baaritaanka qaaxada (TBC)

Qaaxada (TBC) waa cudur weyn oo aduunka oo dhan aad looga helo. Laga yaabee in uu ka jiro wadanka aad adiga ka timid. Dadka qaba qaaxad lakala qaado waxay cudurka qaadsiin karaan dadka kale, tusaale qufaca dartii ama hindhisada. Sidaa daraadeed ayaa marka aad iska dhiibeysid Ter Apel cudurkaan lagaaga baarayaa. Qaaxada waa infakshan inta badan gala sambabaha. Sidaa darteed ayuu baaritaanka ka kooban yahay sameynta raajada feeraha. Haddii aad qaaxo qabto, waxaad Nederland ka heleysaa in lagaa daweeyo. Dacwada qaxootinimada markuu xaalka sidaa yahay waxay bilaabmeysaa daaweynta ka dib.

Talaabada 3: wareysiga isdhiibida

Wareeysiga is dhiibista waxa ay IND inta badan kuugu weydiineysaa su'aalo ku saabsan aqoonsigaada iyo assalkaada. Mararka qaar waxaa lagu weydiin karaa su'aalo dheeraad ah. Taasi waxay dhacdaa haddii aad waddamada qaar ka mid ah ka timid. Wareeysiga is dhiibista laguuguma weydiinaayo su'aalo ku saabsan sababahaaad Nederland ugu soo qaxday.

Immigratie- en Naturalisatiedienst
Ministerie van Veiligheid en Justitie

Immigratie- en Naturalisatiedienst (IND) Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada. Wasaarada cadaalada iyo amniga. Hay'ada socdaalka iyo jinsiyada (IND) waa qeyb ka tirsan wasaarada cadaalada iyo amniga ee Nederland. Shaqaalaha u shaqeya IND waxay kula yeelanayaan wareysiyo ku saabsan qofka aad tahay, jinsiyadaada, safarkaaga iyo sababihii aad wadankaaga uga soo tagtey. Waxaa ay baarayaan sheekadaada gaarka ah iyo xaalada uu ku sugan yahay wadankii aad asalkaa ka timid. Markaa ka dib ayay go'aaminayaan in adiga (si ku meel gaar ah) Nederland aad u joogi kartid, ama in aad dib ugu noqoto wadankii aad asalkaakaga ka timid.

Talaabada 4: gargaar

Waxaad dowlada Nederland ka heleysaa hooy, cunto iyo daryeel caafimaad laga bilaabo marka aad isku dhiibto booliska dadka ajaanibta ah. Isdhiibidaada, isdiiwaangelintaada iyo baaritaanka qaaxada ma qaadanayaan in ka badan seddax maalmood. Xafiiska booliska ajaanibta ee Ter Apel waxaa ku yaal xero qaxooti ee xaruunta dhexe ee gargaarka qaxootiga (COA). Halkaasi waa meel aad ku hooyan karto.

Ka dib marka aad isdhiibto, is diiwaangeliso iyo wareysigaaga isdhiibida ee IND waxaa lagu geynayaa xero qaxooti kale ee xaruunta dhexe gargaarka qaxootiga (COA). Xeradaasi qaxootiga waxay ku

taala meel u dhow xafiiska hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) ee codsigaaga magangelyada ah ka howlgelaya.

COA Centraal Orgaan opvang asielzoekers

Centraal Orgaan opvang asielzoekers (COA). Xaruunta dhexe ee qaxootiga waxay qabtaan u gargaarida qaxootiga wadankan Nederland iyo arimaha la xiriira gargaarkaasi .COA waxay kuu diyaarineysaa hooy, cunto iyo in caymiska caafimaadka aad hesho. Sido kale COA waxaad ugu soo hagaagi kartaa markaad rabto in aad dhakhtar la kulanto. COA waa urur madax banaan go'aana kama gaarayaan codsigaaga magangelyada ah.

Inta aad ku jirto xerooyinka qaxootiga ee COA waxaa wadahadal kuugu yeeraya ururka daryeelka caafimaadka qaxootiga GCA oo lagu ogaanayo xaaladaada caafimaad. Wadahadalkaasi waxaa uu ku saabsan yahay caafimaadkaaga iyo haddii ay jiraan dhib xaga caafimaadka ah iyo in adiga inta aad xerada qaxootiga ee COA joogto daryeel caafimaad oo munaasab kuugu ah laguu siiyo.

Muddada aad joogto xerada qaxootiga ee COA waxa aad heleysaa casumaad baaritaan caafimaadka ee xaruunta caafimaadka. Wada hadalkaasi waxa uu quseeyaa caafimaadkaada iyo dhibaatoyinka caafimaad laga yaabo in aad qabto. Markaas inta aad ku sugan tahay xerada qaxootiga ee COA ayaa lagu siinayaa daryeel caafimaad kan ad u baahan tahay ah.

gza healthcare

Daryeelka Caafimaad ee Magangelyodoonka (GZA) waa ururka aad u tageyso haddii aad xanuunsan tahay ama aad qabto su'aalo xagga caafimaadka. Rug kasta oo dejjinta ee COA waxaa ku yaal xaruun caafimaadka ee GZA. GZA waxa ay kuu sameynayaan ballamada kalkaaliyaha dhakhtarka, kalkaalisada caafimaad, caawiyaha rugta caafimaad ee GGZ ama dhakhtarka qoyska. Waxa aad habeen iyo maalin telefoon kula xiriiri kartaa xaruunta caafimaad 'de Praktijklijn' haddii aad su'aalo xagga caafimaadka qabto: 088 112 21 12. Ka bilow isniin ilaa iyo jimcaha waxaa aad nambarkaas u wici kartaa xitaa su'aalo aan caafimaadka quseyn. Sida tusaale ahaan marka aad u baahan tahay in dhakhtar taqassus ah laguu gudbiyo.

Talaabada 5: wacyi gelin

Xerada qaxootiga ee COA waad kaga nasan kartaa safarkii aad u soo aadey Nederland. Waxaad kaloo yeeli kartaa in aad iskudiyaariso dacwada qaxootinimada ah ee guud. Xaaladaha qaarkood waxaa dhici karta in laga gudbo ama la joojiyo RVT-da waxaana isla markiiba aad galeysaa dacwadda magangelyo ee guud. Xeradaasi qaxootiga ayay ururka gargaarka qaxootiga (VWN) kuugu siinayaan macluumaad ku saabsan dacwada qaxootinimada iyo talada caafimaadka laga bixiyo. Wadahadalkaasi qof turjumaan ah ayaa idiin ka caawinaya turjumida waxkastoo aad adiga iyo shaqaalah VWN ka isu sheegtaan. Waxaad kaloo heleysaa warbixin aad ka akhrisan karto waxyabaha dhacaya inta dacwada qaxootinimada socoto. Shaqaalaha VWN ka sidoo kale inta ay dacwada qaxootinimada socoto way ku wargelinayaan weyna ku caawinayaan. Adeegyada VWN ka waa lacag la'aan. Macluumaadkaga si qarsoodi ah ayaa loola dhaqmayaa.

Talaabada 6: talada qolada caafimaadka

FMMU

Xerada qaxootiga dhexdeeda waxaad balan kula leedahay kalkaaliye caafimaad oo ka socda qolada baaritaanka caafimaadka ee Forensisch Medische Maatschappij Utrecht (FMMU). Kalkaaliyahaasi caafimaad waxaa uu ku weydiinayaa in aad rabto in aad la shaqeyso baaritaanka caafimaadka ah. Baaritaankaasi ujeedadiisu waa in lagu ogaado in aad xaga maskaxda iyo/ama jirka dhib aad ka qabto, dhibkaas oo saameyn kara wareysiga IND ay adiga kula yeelanayso.

Baaritaanka inta uu socdo ayay kalkaaliyaasha caafimadka su'aalo ku weydiinayaan. Haddii loo baahdo, waxay kalkaaliyaasha caafimaadka kuu gudbinayaan dhakhtar si baaritaan intaa ka badan laguugu sameeyo. Kalkaaliyaasha caafimaadka ama dhakhtarka ayaa waxa ka soo baxa baaritaanka u gudbinaya IND. Sidaa waxaa la yeelayaa oo keli yah haddii ay adiga kula fiicantahay. IND markaa inta lagu jiro dacwada qaxootinimada way ku xisaabtamaysaa macluumaadka ku saabsan xaalada caafimaadkaaga.

Waa muhiim in aad runta ka sheegtid haddii ay jiraan dhibaato xaga maskaxda iyo jirka ah oo aad dhibkaasi u sheegto kalkaaliyaasha caafimadka ama dhakhtarka. Haddii aad leedahay calaamad muuqata, waa muhiim in aad u sheegto kalkaaliyaasha caafimaadka. Warbixinta laga qoro baaritaanka caafimaadka waa mid qarsoodi ah. Baaritaanka caafimaadka khasab ma aha. Baaritaanka caafimaadka looma baahno in aad adiga iska bixiso.

Haddii aadan rabin in la shaqeyso baaritaanka caafimaadka, waxaad sidaa u sheegi kartaa kalkaaliyaasha caafimaadka. Haddii xaalku sidaa yahay IND kuma xisaabtamayso markaa xaalka caafimaadkaaga. Taladaan caafimaad waa mid ka baxsan daryeerlka caafimaadka ee aad ka faaiideysan kartid inta aad ku jirto xerada qaxootiga ee COA.

Talaabada 7: caawinaada looyarka

Inta dacwada qaxootinimada ay socoto waxaa ku caawinaya looyar. Looyarkaasi waa ka madax banaan yahay dowlada Nederland.

Raad voor Rechtsbijstand
legal aid

Raad voor Rechtsbijstand (Legal aid). (Golaha gargaarka xaquuqda sharciga). Golaha gargaarka xuquuqda sharciga ah waxaa ay hubinayaan in looyar ku caawina aad hesho haddii aadan iska bixin Karin kharashkiisa. Golaha gargaarka xaqa sharciga ayaa bixinaya kharashka looyarkaasi ku caawinaya. Looyarka uma shaqeeyo ururka gargaarka xaqa sharciga ah. Looyarka waa qof madax banaan oo xaga sharciga kaa caawinaya inta ay dacwadaada magangelyada ay socoto.

Iyadoo laguu soo marinayo golaha gargaarka sharciga (Raad voor Rechtsbijstand) waxaad heleysaa warqad balan ah oo wadahadal aad la yeelaneyso looyar. Waqtiga ay dacwada qaxootinimada ay soconayso oo gaaban darteed, golaha gargaarka sharciga waxuu sugayaa in aad looyar waqti hore yeelato. Haddii uu jiro looyar ku caawinaya, sheeg sidaa marka laguula leeyahay wareysiga isdhibida.

Maalin kasta si fiican ula soco in ay warqad kuu timid! Wadahadalka ugu horeya ee looyarka aad la yeelato aad ayuu muhiim ugu yahay dacwadaada qaxootinimada ah oo sidaa daraadeed waa in aanad seegin. Wadahadalkaasi ayuu looyarkagu kuugu diyaarinayaa wareysiyada aad la yeelanayso IND.
Wadahadalkaan u diyaargarowga ah ee aad la yeelanayso looyarkaaga waxaa uu ka dhacayaa xafiiska looyarka. Waxaa laguu soo dirayaa tilmaamta wadada aad ku tageysid iyo tareyn kaar ama bas si aad looyarka u aado. Inta wadahadalkaan aad ku jirtaan turjumaan ayaa idiinka caawinaya turjumida wax allaale waxii aad istiraahdaan adiga iyo looyarka. Caawinada looyarka uu ku siinayo waa lacag la'aan. Macluumaadkaaga si qarsoodi ah ayaa loola dhaqmayaa.

Dacwada qaxootinimada

Isu dhiibida booliska dadka ajaanibta ah ka dib ugu yaraan 6 maalmood ayay qaadaneysaa ka hor wareysiga koowaad ee IND aad la leedahay. Sida dhacda waa uu ka dheeraadaa intaasi. Xerada qaxootiga ee COA waxaad ku heleysaa warqada oo ay IND kuugu yeerayso wareysiga koowaad. Macluumaad intaa dheer ee ku saabsan dacwada qaxootinimada waxaad maalmo ka dib ka heleysaa ururka gargaarka qaxootiga VWN (fiiri talaabada 5).

Codsigaaga oo aad dib ula noqdo

Waad awoodaa in aad marka aad rabto ka noqoto codsigaaga. Haddii xaalku sidaa yahay waxaa markaa laguula talinayaa in aad looyarkaga la xiriirto ama aad toos ula xiriirto IND. Haddii aad la noqoto codsigaaga, taasi waxay keeneysaa in aadan sii joogi Karin Nederland, marka laga reebo in sabab kale laguugu ogolaanayo in aad sii joogto. Sidaa daraadeed xaq uma lihid in hooy lagu siiyo. Ma ka noqotay codsigaada magangelyo? Waxaa lagu dul saari karaa ka mamnuucis u soo safris. Taasi waa mid quseeysa waddamada Yurub badankooda. Taasi awgeed ma laguu oggola in aad u soo safarto waddamdaasi. Mana aad joogi kartid. Kaddib marka aad la noqoto codsigaada magangelyo waxaa weli kuu macquul ah in aad codsi magangelyo cusub aad sameeyso. Xitaa iyada oo ka mamnuucis u soos safris lagu dul saaray.

Ka hawl galka macluumaadka shaqsiga

Macluumaadka shaqsiga waa warbixinno kala duwan oo adiga kuugu saabsan. Hey'adaha oo buuggan warbixinta ka wada shaqeeyay waxa ay ku xusan yihiin xagga hoose. Hey'adahaan waxa ay ka hawl galaan macluumaadka shaqsiga inta uu socoto codsigaada magangelyo, weydiisigaada ama is xaadirintaada. Iyaga ayaa ku weydiinaayo macluumaadkaada iyo hey'ado kale iyo dad kale haddii loo baahdo. Hey'adahaan waa ay isticmaalaan waana ay keydiyaan macluumaadkaada waxa ayna u gudbiyaan hey'ado kale haddii ay taasi sharciga waafaqsan tahay. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa ku yaal waajibaadka hey'adaha ka hawl galo macluumaadkaada. Waa in ay tusaale ahaan, si taxadder leh oo amaankeeda sugan yahay u adeegsadaan macluumaadkaada. Sharcibixinta xogta shaqsiga waxaa kaloo ku yaal xuquuqdaada, tusaale ahaan:

- in aad aragto ogaatana macluumaadkaada hey'adaha la yaal;
- in aad ogaato waxa ay hey'adaha ku sameyaan macluumaadkaada iyo sababta;
- in aad ogaato hey'adahee loo gudbiyay macluumaadkaada.

Ma dooneysaa in aad dheeraad ka ogaato ka hawl galka macluumaadkaada shaqsiga iyo xuquuqdaada? Markaa eeg websiteyada hey'adaha. Xagga hoose ee buuggan warbixinta ka akhriso ciwaannada websiteyada.

Su'aalo inta badan laysweydiiyo

Ma qabtaa weli su'aalo ka dib marka aad warbixintaan akhrisato?
Su'aalahaasi waxaad weydiin kartaa looyarkaaga ama qof ka tirsan shaqaalaha COA ama ururka gargaarka qaxootiga (VWN).

Cabasho ma leedahay?
Dhamaan hay'adaha ku shaqada leh dacwada qaxootinimada, waxey u shaqeeyaan si xirfad iyo taxadir leh. Haddii aad u aragto in hay'ad aanay si fiican kuula dhaqmin, markaa cabasho waad ka gudbin kartaa. Looyarkaaga ama qof ka tirsan (VWN) ayaa arintan kaa caawini kara.

Daabacadan waxaa si wada jir ah u soo saaray:
Xaruunta dhexe ee qaxootiga (COA) I www.coa.nl
Hayáda dib u celinta iyo bixitanka (DT&V) I www.dienstterugkeerenvertrek.nl
Hay'ada socdaalka iyo jinsiyadaha (IND) I www.Ind.nl
Golaha gargaarka xaquuqda sharciga (RvR) I www.rvr.nl
Ururka gargaarka qaxootiga Nederland I www.vluchtelingenwerk.nl

Oo ka wakil ah:
Wasaarada cadaalada iyo amniga, qeybta siyaasada hijrada www.rijksoverheid.nl

Daabacadan waxa ku qoran xuquuq kuma sheegan kartid. Haddii turjumida ay keento fasiraad kala duwan waxaa la raacayaa kan afka Nederlaanka ah.